

Waxa ay tahay in aad ka oggaato baaritaanka dhuluqada marinka hoose ee minka (cervical screening).

Waa maxay baaritaanka dhuluqada marinka hoose ee minka (cervical screening)?

Baaritaanka dhuluqada marinka hoose ee minka waabaaritaan lagu sameeyo dadka halista ugu jira in uu ku dhaco kaansarka ku dhaca dhuluqada marinka hoose ee minka (cervical cancer), laakiin aan lahayn astaamaha ee guud ahaanna dareema fiicnaan. Barnaamijka Baaritaanka Dhuluqada Marinka Hoose ee Minka ee Ontario (Ontario Cervical Screening Program) waa barnaamij baaritaan dadkan ku dhiirrigelinaya in ay si joogto ah isu baaraan. Baaritaanka dhuluqada marinka hoose ee minka ee joogtada ah ayaa kaa caawin kara ka hortagga in uu kugu dhaco kaansarka dhuluqada marinka hoose ee minka (cervical cancer).

Kaansarka ku dhaca dhuluqada marinka hoose ee minka (cervical cancer) waa kaansar ku dhaca dhuluqada marinka hoose ee minka. Dhuluqada marinka hoose ee minka waa qayb jirka ka mid ah oo minka (ilmogaleenka) ku xiriirisa siilka (afka xubinta taranka ee haweenka). Kaansarka ku dhaca dhuluqada marinka hoose ee minka (cervical cancer) waxaa had iyo jeer keenna fayruska waraabeeyaha (HPV). Adiga **uma** badna in uu kugu dhaco kaansarka dhuluqada marinka hoose ee minka (cervical cancer) haddi dad kale oo ka tirsan qoyskaaga uu ku dhacey kaansarka.

Waa maxay fayruska waraabeeyaha (HPV)?

HPV waa fayras ka gudba hal qof oo u gudba qof kale iyaga oo isugu gudbinaya xiriir galmo. Xiriirk galmo waxaa ka mid noqon kara waxyaabo badan oo kala duwan. Xaashidan xaqiiqda, waxaa ka mid ah waqtii kasta ee uu qof kale taabto xubnahaaga taranka (qaybaha gaarka ah). Xiriirkan waxaa uu noqon karaa gacmaha, afka ama xubnaha taranka.

HPV waa mid caam ah oo isaga ayaa iskiisa isaga baxa isaga oo aan wax waxyello ah kuu geysan.

Waxaa jira in ka badan 100 nooc oo HPV ah waxayna isbeddelo u keeni karaan unugyada dhuluqada marinka hoose ee minka. Noocyada **qaar** ee HPV, isbeddeladan unuggga ayaa muddo ka-dib isu beddeli kara kaansarka ku dhaca

dhuluqada marinka hoose ee minka haddii aanan la daaweyn.

Waa maxay baaritaanka dhuluqada marinka hoose ee minka?

Baaritaanka dhuluqada marinka hoose ee minka ee eegaya noocyada HPV ee mararka qaar keenaya kaansarka ku dhaca dhuluqada marinka hoose ee minka. Wuxuu sidoo kale eegayaa isbeddelada unugga ee ku yimaada dhuluqada marinka hoose ee minka ee ay keenaan noocyadan HPV. Baaritaanka **ma** eego noocyada kale ee HPV.

Baaritaanka dhuluqada marinka hoose ee minka wuxuu beddelaa baaritaanka Pap sababta oo ah waxaa uu ku wanaagsan yahay in uu gacan ka geysto ka hortagga kaansarka ku dhaca dhuluqada marinka hoose ee minka.

Waa kuma cidda ay tahay in la baaro oo intee jeer ayaa la baarayaa?

Barnaamijka Baaritaanka Dhuluqada Marinka Hoose ee Minka ee Ontario wuxuu ku talinayaan in dadka inta badan ee xaqa u leh baaritaanka dhuluqada marinka hoose ee minka in la baaro **5 sano kastaba mar.**

- Is-baar haddii:
 - Aad tahay ugu yaraan 25 sano jir ah, iyo
 - Aad tahay haweenay, Qof Laba-ruux leh ah, qof dhalasho ahaan dheddig ah balse muuqaal ama tayo labood leh ama qof laba jinsiile ah oo leh dhuluqada marinka hoose ee minka, iyo
 - Waligaa la yeelatey xiriir galmo qof kale, iyo
 - Haddii aadan lahayn astaamaha, sida dhiigbox kala duwan ama dheecaan (cad ama dheecaan jaalle ah) oo ka imaanaya siilka (afka xubinta taranka ee haweenka)
- Waa in weli lagu baaraa haddii:
 - Aad qaadatey tallaalka HPV
 - Aad dareento caafimaadqab
 - Aad martey caado-bax
 - Aadan lahayn xubno ka tirsan qoyskaaga oo uu ku dhacay kaansarka ku dhaca dhuluqada marinka hoose ee minka
 - Aad xiriir galmo la yeelatay 1 qof oo kaliya
 - Aad lahayd isla hal shiriig galmo muddo dheer
 - Aadan yeellan xiriir galmo muddo dheer
 - Aad xiriir galmo la lahayd qof aad isku-jinsi tiihin

Waxaad u baahan kartaa in aad qaadato baaritaanka dhuluqada marinka hoose ee minka **3 sano** kasta mar haddii aad leedahay hab-dhiska difaaca jirka oo daciif ah. Tusaale ahaan, haddii aad la nooshahay HIV/AIDS ama unug jirkaaga lagu talaalay.

Baaritaanka dhuluqada marinka hoose ee minka ayaa sidoo kale lagu taliyay ka-dib marka lagaa

daaweeyo isbeddellada unuga ee dhuluqada marinka hoose ee minka. Iyadoo lagu saleynayo natijjooyinka daaweyntan, dhakhtarkaaga, kalkaaliye caafimaad xirfadle ah, kalkaaliye caafimaad ama ummuliso ayaa kula socodsiinaysa inta jeer ee ay tahay in lagu baaro.

Dadka intiisa badan waxaa ay joojin karaan baaritaanka dhuluqada marinka hoose ee minka laga bilaabo da'da 65 ilaa 69. Dhakhtarkaaga, kalkaaliye caafimaad xirfadle ah, kalkaaliye caafimaad ama ummuliso ayaa kaa caawin kara go'aaminta haddii weli lagaa baarayo ka-dib da'da 69.

Maxaa dhacaya inta lagu guda jiro baaritaanka dhuluqada marinka hoose ee minka?

Baaritaanka dhuluqada marinka hoose ee minka waa sida baaritaanka Pap oo kale. Dhakhtar, kalkaaliye caafimaad oo xirfadle ah, kalkaaliye caafimaad ama ummuliso ayaa adeegsan doonna burash yar, jilicsan si uu unugyo uga soo qaado dhuluqada marinka hoose ee minka si shaybaarka uu ugaga baaro unugyada noocyada HPV iyo isbeddellada unugga. Qofka baaritaankaaga sameynaya wuxuu isku-dayi karaa in uu baaritaanku ka dhigo mid raaxo kuu leh intii suuragal ah.

Maxaa dhacaya kadib baaritaanka dhuluqada marinka hoose ee minka?

Waxaad natijjadaada baaritaanka dhuluqada marinka hoose ee minka ku heli doontaa boostada. Qofka baaritaanka kugu sameeyay ayaa sidoo kale heli doonna nuqlka natijjadaada wuxuunna kaaga jawaabi karaa su'aalo kasta ee laga yaabo in aad qabto. Waxaa ay sidoo kale kaaga la hadli karaan tallaabooyinka xiga.

Qabidda nooc HPV ah oo mararka qaarkood keeni karta kaansarka ku dhaca dhuluqada marinka hoose ee minka macnaheedu ma ahan in aad qabto kaansarka ku dhaca dhuluqada marinka hoose ee minka, laakiin waxaad u baahan kartaa

baaritaan loo yaqaanno **cervical colposcopy** (oo loogu dhawaaqo kaal-boos-ka-bii).

Baaritaanka colposcopy ee dhuluqada marinka hoose ee minka (Cervical colposcopy) waa baaritaan uu sameeyo dhakhtar takhasusi ah, sida dhakhtarka caafimaadka haweenka (gynecologist). Inta lagu guda jiro baaritaanka (colposcopy), takhasuslaha ayaa si dhow u eegaya dhuluqada marinka hoose ee minka (cervix) marka loo eego inta lagu guda jiro baaritaanka dhuluqada marinka hoose ee minka si loo arko haddii aysan wax caadi ah u muuqan. In aad qaadato baaritaanka colposcopy ayaa kaa caawin karta ka hortagga in uu kugu dhaco kaansarka ku dhaca dhuluqada marinka hoose ee minka (cervical cancer).

Maxaa saameyn ku yeellan kara fursadeyda qaadista kaansarka ku dhaca dhuluqada marinka hoose ee minka?

Waxaad hoos u dhigi kartaa fursadaada qaadista kaansarka ku dhaca dhuluqada marinka hoose ee minka adiga oo si joogto ah laguu baaro.

Fursadaada qaadista kaansarka ku dhaca dhuluqada marinka hoose ee minka ayaa sare u kaceysa marka ay da'daadu sii kororto, haddii aad sigaar cabto iyo haddii aad waligaa xiriir galmo la yeelatey qof kale. Booqo mycanceriq.ca si aad u hesho wax badan oo ku saabsan waxa saameyn kara fursadaada qaadista kaansarka ku dhaca dhuluqada marinka hoose ee minka.

Sida loo sameysto ballanta baaritaankaaga?

Wac dhakhtarkaaga, kalkaaliyaha caafimaadka xirfadaha ah, kalkaaliyaha ama ummulisada si aad u weyddiiso in ay baaritaankaaga sameeyaan
-ama-

Isticmaal Health811 waqtii kasta si aad u hesho rug caafimaad oo sameysa baaritaannada dhuluqada marinka hoose ee minka:

- Ka baar “cervical screening test” bartan ontario.ca/healthservices

- Wac 811 (TTY: 1.866.797.0007)
- Isticmaal madasha wada-sheekaysiga tooska ah ee ontario.ca/health811

**Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo:
ontariohealth.ca/cervical-test**



Ma u baahan tahay macluumaadkan oo ah qaab fudud oo la adeegsan karo?
1-877-280-8538, TTY 1-800-855-0511, info@ontariohealth.ca.